# HESHIISKA
# u dhaxeeya
# MIDAWGA MACALIMINTA EE BOSTON iyo
# GUDIGA DUGSIGA BOSTON SCHOOL

## TIXRAAC: Caafimaadka iyo Badqabka ee SY21-22

Haseyeeshee khilaafkasta oo u dhaxeeya shuruudaha heshiiskan iyo heshiiska baayactanka loo dhan yahay ee dhinacyada, shuruudaha heshiiskan ayaa la aqbali doonaa.

Iyadoo laga jawaabayo dalabka Midowga Macalimiinta Boston ("BTU") si loogu heshiiyo saameynta xubnaha BTU ee kusoo noqonaya dugsiga inta lagu jiro xanuunka karoona fayraska, dhinacyadu halkan waxay isku raaceen kuwa soo socda:

1. The Boston Public Schools ("BPS") waxay bixin doonaan goob 6ft masaafo ahaan kala durugsan ama qol dugsigiiba oo loogu talogalaya baadhitaan iyo karantimayn ardeyda leh astaamaha Covid-19 ee sugaaya natiijooyinka ama laga helay Covid-19. Walaacyada ku xeeran goobta, asturnaanta iyo kormeerka goobta karantimaynta dugsiga waxa lala socodsiin doonaa hogaamiyaha hawlgalka dugsiga. Koox tiro siman oo wakiilada BTU iuo BPS (aan ka badneyn lix xubnood wadartood) oo uu xushay dhinac kasta ayaa booqan doonaa dugsiga si ay dhibka u wada xaliyaan. Haddii loo baahdo goob ama qolal dheeriya hogaamiyaha dugsiga ayaa tixgalin doona goobaha aan wax lagu dhigan marka hore.

2. Xubnaha BTU waxay soo qaadan doonaa maaskarooyinkooda, lakiin BPS waxay siin doontaa maaskaro haddii shaqaaluhu ilaawaan inay soo qaataan maaskaro ama uu wax ka noqda inta lagu jiro maalinta.

3. BPS waxay hayn doontaa dhowr nooc oo maaskaro kala duwan xajmiga ah (oo ay ku jiraan maaskaro waadixa), ilaalinta indhaha, aan lahayn kiimiko, gulufisyo, iyo goonan marka ay u baahdaan shaqaaluhu iyadoo la raacayo tilmaamta DESE iyo CDC.

   BPS waxay bixin doontaa PPE iyadoo la raacayo tilmaamta DESE iyo CDC ee kooxo khaasa oo shaqaale, marka la codsado, oo ay ku jiraaan kuwan soo socdaa:

   Falanqeynta Ku Saleysan Hab-dhaqanka (ABA)
   - Marooyinka Wajiga
   - Goonan la Tuuri Karo
   - Maaskarada Qaliinka

   Xarunta Barbaarinta Caruurta
   - Marooyinka Wajiga
   - Goonan la Tuuri Karo
   - Maaskarada Qaliinka

   Kudarka Barbaarinta Caruurta
   - Marooyinka Wajiga
   - Goonan la Tuuri Karo

- Maaskarada Qaliinka

Naafada Dareenka
- Marooyinka Wajiga
- Goonan la Tuuri Karo
- Maaskarada Qaliinka

Naaafada Dareenka - Gudaha
- Marooyinka Wajiga
- Maaskarada Qaliinka

Ka mid noqoshada
- Maaskarada Qaliinka

Naafada Caqliga
- Maaskarada Qaliinka

Naafada Caqliga Dhexdhexaad
- Marooyinka Wajiga
- Maaskarada Qaliinka

Naafooyin Badan/Naafo Jidheed
- Marooyinka Wajiga
- Goonan la Tuuri Karo
- Maaskarada Qaliinka

Naafooyin Dhowra oo Daran
- Marooyinka Wajiga
- Goonan la Tuuri Karo
- Maaskarada Qaliinka

Maalin Gaara
- Marooyinka Wajiga
- Goonan la Tuuri Karo
- Maaskarada Qaliinka

Naafonimada Barashada qaaska ah
- Maaskaro Waadixa
- Maaskarada Qaliinka

4. BPS waxay siin doontaa kalkaaliso kasta shan shaashadood oo N95 ah si loogu isticmaalo iyadoo la raacayo hab-maamuuska isticmaalka balaaran ee CDC. Maaskarada KN95 waxa la bixin doonaa sidoo kale marka loo baahdo iyadoo loo fiirinaayo tilmaamaha CDC.

5. BPS waxay ogolaatay inay rakibto oo ilaaliso xogta Tayada Hawada Gudaha ee fasalada. BPS waxay aqoonsanaysaa masuuliyada si ay u bixiso macluumaadka midowga ee G.L. c. 150E waxayna u fulin doonaa waajibaadkeeda sidaasi.

6. Dhamaan shaqaalaha BPS waxay fursad u heli doonaan inay ka qeybgalaan baadhis PBS kooxa oo todobaadle ah. Xubnaha BTU ee muujinaya astaamaha ay yeesheen intii lagu jiray shaqada maalintii, waa inay ogeysiiyaan kormeerahooda iyo xubinta awoodi doonta inay fuliso baadhi dhakhso ah, marka baadhitaanadan laga helaayo, goobta karantimaynta/qolka dugsiga si dugsiga loosii joogo haddii baadhistu noqoto nagatif. BPS waxay ogeysiisay BTU inay qaadayso talaabooyin si loogu helo baadhitaano dhakhso ah xubnaha shaqaalaha ee yeesha astaamaha inta la shaqeynaayo.

7. Kalkaalisooyinku ma gudan doonaan baadhitaan ardey ama shaqaale oo kooxa, lakiin kalkaalisooyinku waxay sameyn doonaan baadhitaanada dhakhsaha ee Binax ee ardeyda leh astaamaha. Kalkaalisooyinku waxay ogeysiin doonaan adeegyada caafimaadka marka uu jiro ardey leh astaamaha oo helay baadhista dhakhsaha ee Binax iyo natiijada baadhista. Kalkaalisooyinku waxay sidoo kale codsan karaan tilmaam ama caawimo, taasooy ku jiraan caawimada dheeriga ah ee shaqaalaha, haddii baahiyaha ardeygu ka bataan awoodooda. Kalkaalisada dugsiga loogama baahna inay noqoto iskuduwe CIC ah.

8. Heerkulada waxa lasocon doona Waaxda Tamarta maalintiiba, oo warbixinaha heerkulka ayaa la diyaarin doonaa, marka la codsado, iyagoo muujinaya celceliska heerkulka ee dhismaha 7:00 am, 11:00 am, iyo 3:00 pm maalinta ka horeysa.

9. Ujeedooyinka raadraaca xiriirka awgood, BPS waxay ku dari doontaa "xiriir dhow" qofkasta oo buuxiya qayaxitaanada lagu sheegay nidaamyada BPHC iyo CDC. BPS waxay si adag u dabaqi doontaa oo raaci doonta nidaamyada raadraaca xiriirka ee khuseeya BPHC. Marka BPS ogaato isbadelka qayaxitaanada BPHC ee "xiriirka dhow" ama nidaamyada khuseeya BPCH si dhakhso ah ayey usoo ogeysiin doontaa BTU. Ka dib raadraaca xiriirka marka la dhameystiro, BPS waxay ogeysiin doontaa bulshada dugsiga inay jireen kiisas la helay. BPS waxay ogeysiisay BTU inay shaqaaleysiisay 5 raadraace xiriir bilowga sanad dugsiyeedka 2021-2022 si ay u dadejiso raadraaca xiriirka.

10. Shaqaalaha leh astaamaha lagu aqoonsaday xiriirka dugsiga/BPS waa inay ka qeybgalaan baadhista oo wadaan barnaamijka iyagoo raacaya tilmaamaha DESE iyo BPCH.

11. BPS waxay sii wadi doontaa inay soo sheegto kiisaska la helo ee CPVOD-19 si todobaadleh wabsaaydka BPS.

12. Midowgu wuxuu ogalaaday inuu aqbalo Xaqiijinta Talaalka Magaalada Boston ama Baadhista Loo Baahanyahay ee Siyaasada COVID-19 (halkan ah "Siyaasad") taasoo dhamaan shaqaalaha la daboolay ee Magaalada Boston ("Magaalada") looga baahan doono inay xaqiijiyaan xaalada talaalkooda; oo shaqaale kasta oo aan xaqiijin in aanu si buuxda u talaalnayn waxa looga baahan doonaa inuu gudbiyo cadeynta todobo kasta (7) oo cisho oo baadhista COVID-19 oo nagatifa. Midowgu wuxuu intaasi dheeriya ogolaaday in BPS

ku qanacday dhamaan heshiisyada waajibaadka M.G.L. c. 150E ee la xiriira hirgalinta Siyaasada.

13. Dhinacyadu waxay isku raaceen in bilowga Heshiiskan, Magaaladu dibu asaasi doonto dheelitirka toban (10) maalmo shaqo (aan ka badnayn 80 saacadood) oo fasaxa xanuunka COVID-19, sida lagu sheegay Kabka Fasaxa COVID-19 ee Ku Meelgaarka Magaalada, ee Shaqaale Midwoga ah oo kasta. (Heshiskani ma siinaayo fasax xanuun oo COVID-19 inka badan toban (10) maalmo shaqo/80 saac oo fasaxa xanuunka ee COVID-19 sida imika lagu xusay Kabka Fasaxa COVID-19 ee Ku Meelgaarka Magaalada). Intaasi wax dheer, Dhinacyadu waxay isku raaceen sanad guurada taariikhda dhaqangalka Siyaasada, iyo si sanadleh ah intaasi ka dib, Magaaladu waxay dibu asaasi doontaa dheelitirka toban (10) maalmo shaqo (aan ka badneyn 80 saac) oo fasaxa xanuunka ee COVID-19 oo shaqaale midowga oo kasta ah sanadkasta in Siyaasadu sii shaqeyso. (Heshiskani ma siinaayo fasax xanuun oo COVID-19 inka badan toban (10) maalmo shaqo/80 saac oo fasaxa xanuunka ee COVID-19 sida imika lagu xusay Kabka Fasaxa COVID-19 ee Ku Meelgaarka Magaalada).

    Sanad dugsiyeedkan 2021-2022, xubnaha qeybta heshiiska BTU ee si buuxda loo talaalay, ama leh cadeymo qoran oo la ansixiyey oo caafimaad ama diimeed **iyo** iyadoo la raacayo baadhista todobaadlaha ee nagatifka ee COVID-19, ee dhameystay 10 maalmood oo fasaxa COVID-19 tixraaca qoraalka sare ee 13, ee laga helay COVID-19 waxay heli karaan ilaa toban (10) maalmo shaqo dheeriya oo fasax mushahar leh ah haddii ay bixiyaan dukumentiyo caafimaad oo saxeexan oo in laga helay COVID-19.

14. Inta BPS si buuxda u shaqeynayso shakhsiyan, macalimiinta loogama baahan doono waxbaris "isbarbarsocota". "Waxbarista isbarbarsocota" waa halka macalimiintu siinayaan waxbarasho toosa ardeyda wax ku baranaysa dhismaha dugsiga isla markaana sidoo kale ardeyda wax ku baranaysa meel durugsan. Xubnaha BTU waxay bixin doonaan waxbarasho maalinle ah oo ay ku heli karaan ardeyda hab dhijitaal ah iyagoo maraya madasha dugsiga si ardeyda maqa usii wadi karaan inay sameeyaan horumar waafaqsan ardeyda fasalkooda iyo si ardeydu ugula shaqeyn karaan macalimiinta dibada si loo ilaaliyo lasocodka waxbarashada fasalka. Marka fasal dhan si ku meel gaara meel durugsan wax uga baranaayo, macalimiinta waxa lagu jihayn karaa inay wax u baraan hab durugsan. Dhinacyadu waxay isku raaceen inay kulmaan si looga doodo siyaasadaha lagusii wadaayo waxbarashada ardeyda si ku meel gaara aan u awoodin inay wax ugu dhigtaan fasalka, iyo, si looga wada hadlo heerka sharcigu u baahan yahay.

15. Heshiiskani wuxuu dhaqan galayaa marka la bilaabo wuxuuna dhacayaa Juun 30, 2022 ilaa lagu kordhiyo heshiish wadajir ah.

16. Shuruudaha heshiiskani waxa lagu dhaqan galin doonaa nidaamka cabashada iyo xalinta-cabashada ee Heshiiska Loo Dhanyahay.

17. Heshiiskani wuxuu ku xiran yahay ansixinta Gudiga Dugsiga Boston.

18. Dhinacyadu waxay isku raaceen in heshiiskani aan loo isticmaalin tusaale arin kale oo kasta.

| | |
|---|---|
| _____ | _____ |
| Jessica Tang | Brenda Cassellius, Ed.D |
| Madaxweyne | Kormeer-Guud |
| Midowga Macalimiinta Boston | Boston Public Schools |

BPS waxay ogeysiisay BTU inay sii wadi doonaan nidaamyadan badqab iyo caafimaad ee soo socda lagana keenay sanadkii hore:

1. Suuliyada BPS waxya leeyihiin marwaxado/nidaamyo ay u baahan yihiin Xeerarka Dhismaha iyo BPS waa baadhista iyo ilaalinta marwaxadaha suuliyada si loo hubiyo hawl joogto ah.

2. Xafiiskastoo caafimaad wuxuu leeyahay bilaydh rasmiya ama ku meelgaara.

3. Taandhooyin ayaa loo helay dugsigiiba sanad dugsiyeedka 2021-2022.

4. Dhamaan dugsiyadu waxay yeelan doonaan laba mid uun nidaamyada HVAC-ga dhexe oo leh ka go'naasho ama 100% ka baxsan nidaamyada hawo bixinta ama cutubyo sifaynaya hawada la qaadi karo. BPS waxay sii wadi doontaa ilaalinta hawo nadiifiyaha la qaadan karo ee lagu rakibay sanadkii hore goobaha waxbarashada dhamaantood ardeydu si joogto ah u fadhiisato wakhtiga waxbarashada. MERV-13 ama shaandhooyin kale ayaa lagu rakibay xarunta nidaamyada HVAC iyada oo hagitaanku ku talinayo qalabka sida la oggol yahay. BPS waxay hada dhameystirtay badelista shaandhooyinka 6-bilood ee loo baahan yahay ee cawo nadiifiyayaasha. BPS waxay sii wadi doontaa inay badesho shaanshooyinka wareega oo leh tilmaamaha soosaaraha.